

## **XEER L. 61 rep.**

### **MAAMULAKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA XOGHAYAHA GUUD**

MARKII UU ARKAY xeer 4 novembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dulka soomaliya ee Talyaanigu maamulo sinayana fulin buuxda,

WAXAA LOO ARKAY in ay lagama maarmaan tahay in la asaaso duruus caadi ah oo loogu talagalay carruurta aan qaan\_gaarka ahayn ee lagu xiro xarunta dhaqan celinta ee xabsiga Muqdisho;

IN LA TIXGELIYO maqnaansho, haddii maamuluhu uu ka tago shaqadiisa waxaa qabanaya Xoghayaha Guud iyadoo la raacayo Xeerka n. 47 ee 22 Luulyo 1950;

MARKA UU DHEGEYSTAY soo jeedinta Golaha Dhexe ee Dugsiyada;

### **WUXUU XEEREYAY**

#### **Qod. 1**

Dugsi hoose ayaa loo asaasay carruurta aan qaan gaarka ahayn ee lagu xiro xarunta dhaqan celinta ee xabsiga Muqdisho.

#### **Qod. 2**

Dugsiga hoose ee dhaqan celinta dhallaanka waxa uu ku tiirsan yahay Xafiiska Caafimaadka iyo wacyigelinta dadweynaha.

Shahaadooyinka, waraaqaha warbixinta iyo xirfad aqooneedka uu soo saaro dugsiga waxay tusineysaa maamulka waxbarashada gaar ah iyada oo aan loo noqoneynin maamulka xabsiga ama rugta dhaqan celinta caruurta.

#### **Qod. 3**

Sannad dugsiyeedku waxa uu leeyahay muddo soconeyso laba iyo toban bilood, oo loo qaybinayo seddax xilli oo midwalba saddex biloodle yahay, xilli kastana leeyahay bil fasax ah.

Sannad dugsiyeedku waxa uu billaabanayaa 1da maajo waxa uuna dhammaanayaa 30 abriile sannad walba.

Immaatinka dugsiyada waa qasab.

#### **Qod. 4**

Shan iyo tobanka maalmood ee ugu dambeysa bisha maarso ee sannad walba waa waqtiyada imtixaanka iyo dorashooyinka.

Qaar ayaa lagu soo koobaa 5/10 oo aan ka badnayn laba maado oo imtixaankana ku qaadan kara kalfadhiga labaad.

Xaaladaha kale, kuwa aan gudbin waa la celiyaa.

Kuwa dib loo dhigay ayaa loo oggolaaday inay dhigtaan fasalka sare ee qaybta saddexaad bisha Juun ee sannad kasta, waxaa laga qaadayaa imtixaannada kalfadhiga labaad. Haddii ay gudbaan waxaa lagu qoraa fasalkaas, haddii loo diido waxa ay u noqdaan fasalkii hore.

#### **Qod. 5**

Iyada oo aan wax loo dhimeynin qodobbada 3 iyo 4, waxa la raacayaa jadwal dugsiyeedka dugsiyada ku tiirsan Maamulka.

Jadwalka fasalka waxaa dejinaya maamulka awoodda u leh ee dugsiga iyadoo waafaqsan ogolaashaha maamulaha machadka xabsiga.

### **Qod. 6**

Waxa la magacaabayaa xubnaha hay'adda waxbarista dugsiga ee Talyaaniga iyo dadka degaanka, waxa magacaabayoo hay'ad awood u leh oo ka imaanaysa maamulaka, waxaana lagama maarmaan ah in ay aqbasho wasaaradda howlaha guud.

### **Qod. 7**

Qalabaynta iyo agabka waxbarista waxaa u xilsaaray dugsiga hay'ado dugsyeed karti u leh maamulidda dugsiyada, waxaana masuul ka ah maamulaha xabsiga.

Isla sidaas oo kale waxa noqonayo qalabka wax lagu baro, buugaagta iyo agabka loo qoondeeyey ardayda si lacag la'aan ah.

### **Qod. 8**

Macahadka xabsiga waxa laga rabaa in uu sameeyo meelo shaqo oo la heli karo kuna habboon caafimaad ahaan iyo waxbarasho ahaan in uu u isticmaalo dugsi garoomada ciyaarta iyo jimicsiga.

Dayactirka dhismooyinka kor ku xusan ayaa muhimad gaara u leh hey'adda kor ku tilmaaman.

### **Qod. 9**

Waxa waajib ku ah maamulka machadka xabsiga in ay siiyaan shaqaalaha nadaafadda si ay u nadiifiyaan fasallada waxbarashada iyo sidoo kale ilaaliyayaasha lagama maarmaanka ah.

### **Qod. 10**

Maamulka dhexe ee dugsiyada hoose waxa ay sameyn karaan baaritaan, iyaga oo ku wargelinaya maamulaha machadka xabsiga.

### **Qod. 11**

Amarkan waxa uu dhaqan gelayaa taariikhda lagu daabaco fafinta rasmiga ah ee maamulka ee AFIS.

**XOGHAYAHA GUUD**  
**Canino**